



Macluumaad Ku Saabsan Gargaarka Qoysaska Heli Karayo ee Sidii ay Kirada Ku Bixin Lahaayeen iyo Biilasha Korontada

Qoysaska Qaaliga ah ee PPS,

Waxaan jecelnahay inaan idinla wadaagno macluumaad ku saabsan gargaarka kirada iyo korontada taasi oo ka caawinaysa qoysaska ay dhibtu ka haysato sidii ay iskaga bixin lahaayeen biilaashaasi iyada oo sababtu tahay xanuunka faafayey ee COVID-19.

Gargaarka Kirada/Ijaarka

[Barnaamijka Gargaarka Kirada Xaalada Degdega ee Oregon](#) wuxuu kafaala qaadayaa kiradii muddo dhan ilaa 12 bilood taasi oo aad bixin kari wayday iyo saddexda bilood ee soo socda oo la rajeynayo, marka dhammaan la bixiyo kiradii hore ee kugu waajibtay inaad bixiso. Barnaamijku wuxuu sidoo kale dammaanad qaadayaa inuu bixin doono kharashyada korontada oo ay ka mid yihiin gaaska, addeegyada tamarta ee guryaha lagu isticmaalo, biyaha,bulaacadaha, qashin-qaadista, internet-ka, meelaha lagu kaydiyo dareerayaasha tamarta ee guryaha lagu isticmaalo.

1. Haddaba si toos ah u codso gargaarka kirada/ijaarka iyo korontada online adiga oo booqanaya: oregonrentalassistance.org.
2. Waa in aad keentaa caddeyntha ah inaad ka cadsatay mulkiilaha guriga in muddo 90 maalmood ah kaa saarin guriga inta ay ku soo gaarayso kaalmada kirada aad iskaga bixineyo(Degmada Multnomah). Kiraystayaashu waxa ay haystaa ilaa bisha Febraayo 28, 2022 inay ku bixiyaan kirada lagu leeyahay(Abriil 2020 ilaa Juun 2021). Haddii aad hesho ogeysiiska inaad ka baxdo guriga, fadlan waa inaad wacdaa [Mashuuraca Ka Difaacida Guri Ka Saarista](#) ee telefoonkoodu yangay 888-585-9638 waxaad sidoo kale ogaataa inaad fahamto xuquuqdaada aad leedahay iyo inaad hesho gargaarka dhinaca sharciga lagaa kaalmeeyo oo bilaa lacag ah.

Gargaarka Korontada oo Toos ah

Shirkadaha korontadu sidoo kale waxay leeyihii barnaamijyo iyaga u gaar oo lagu kaalmo ah, iyada oo ayna u eegbyn dakhliga lacafeed guriga soo gala ama shuruudo kale oo ku xiran si aad xaq ugu yeelato.

- Pacific Power: Shirkadani korontadu waxay kaa cafinayaan lacag dhan ilaa \$300. Wuxaad booqataa pacificpower.net/assistanceplus ama waxaad wacdaa telefoonka 1-888-221-7070
- PGE: Shirkadani kale ee korontadu waxay bixinaya lacag deeq ah oo dhan ilaa \$500 iyada oo lacag u dhiganta deeqdani la bixinayo. Wuxaad booqataa halkan portlandgeneral.com/help/covid-19/helping-residential-customers ama waxaad wacdaa telefoonkan 1-800-542-8818



PORLAND PUBLIC SCHOOLS

- NW Natural: Shirkadanina waxay kaa cafinayaan lacag dhan \$300. Waxaad booqataa halkan nwnatural.com/paymentassistance ama waxaad wacdaa telefoonka 1-800-422-4012

Wixii su'aalo ah ama meelo kale oo macluumaad aad ka hesho waxaad wacdaa 2-1-1 ama waxaad booqataa 211info.org. Waxaad sidoo suurtagal ah inaad la xiriirto la-taliyaasha dugsiga ama shaqaalaha bulshada haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah ama agabyo kale.

Mahadsanidin.